IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGAAH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 20 Luulyo 1981 L. 1r7

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lambar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## KOOBNIIN

## SHARCI

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI L. 42 ee 12 Maajo 1981, Meel ma-rin heshiis dhexmaray JDS iyo D/Islaamka Bakistaan. — Bogga 1069

SHARCI L. 43 ee 18 Juunyo 1981, Dhismaha Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed. » 1070

SHARCI L. 44 ee 18 Juunyo 1981, Dhismaha Mashruuca Ciribtirka Gosha iyo Genbiga .— » 1078

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D S. L. 35 ee 28 Sebt. 1981, Kirada Cusub ee Baabuurta Xamuulka Qaada Booyadaha iyo Iskarogaha.— » 1083

WAKAALADDA M. QARANKA

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYINKA ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15.7.81, Lumid Jeeg War. Lamb. 300459 ku Qoran Seynaba Yuusuf Cali L. 659 » 1086

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15.7.81, Lumid Jeeg War. Lamb. 264837 ku Qoran Seynab Yuusuf Cali L. 660 » 1078

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15.7.81, Lumid Jeeg War. Lamb. 158959 ku Qoran Cabdullaahi Axmed Nuur L. 661 » 1088

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15.7.81, Lumid Jeeg War. Lamb. 026186 ku Qoran Cabdullaahi Axmed Nuur L. 662 » 1089

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 9.6.81, Lumid Buug Keyd L. 959 ku Qoran Salaado Cabdulle Jaamac L. 663 » 1090

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 9.6.81, Lumid Buug Keyd Lamb. 16068 ku Qoran Asli Maxamed Cali L. 664 » 1091

QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 24 taariikh 12 Maajo 1981 Meel marin Heshiis dhexmaray J.D.S. iyo D/Islaamka Bakistaan.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga sii socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta Heshiiska dhaqaneed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Islaamka ee Bakistaan oo lagu kala saxiixday Magaalada duqdisho Taariikhdu markay ahayd 20 Setembere 1980.

2. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharcigaan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, dhaqan galkiisuna waxaa la waafajinayaa Qod. 72aad ee Dastuurka iyo qodobbada uu ka saameeyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meel-mariyo Heshiiska Sharcigan lagu soo tilmaamay sida uu qabo Qod. 82aad ee Dastuurka JDS.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 43 Taariikh 18 Juunyo 1981 Dhismaha Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

*(Dhismaha Wakaaladda)*

1. Waxaa la mideeyey Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha, Warshadda Hargaha iyo Kabaha ee Hargeysa iyo Warshadda Hargaha ee Burco, waxayna qaadanayaan magaca Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed.

2. Wakaaladdu waxay hoos imaaneysaa Wasaaradda Warshadaha.

3. Wakaaladdu waa mid madax bannaan, waxayna leedahay jiritaan iyo shakhsiyad sharciyeed.

4. Wakaaladda waxaa lagu meeleeyey darajada (A).

5. Wakaaladdu waxay ku dhaqmeysaa Sharcigan soo socda:

I) Sharciga lambar 16 ee 1.4.1970;

II) Sharciga lambar 36 ee 2.4.1972;

III) Xeerka Madaxweynaha J.D.S. lambar 74 ee 22.4.1972 iyo beddelaaddii ka dambeysay;

IV) Sharciga lambar 58 ee 31.7.1972 iyo

V) Sharciga lambar 5 ee 2.2.1980:

Qod. 2aad

*(Ujeeddooyinka Wakaaladda)*

Ujeeddooyinka Wakaaladda waxay yihiin:

1. In ay dib u habeyso, xoojiso, horukacna ku sameyso hay'adaha hadda jira, lugna ku leh ganacsiga Warshadeynta, soo saaridda hargaha iyo saamaha iyo alaabta la xiriira.

2. In ay hagaajiso, korna u qaaddo tirada iyo tayada hargaha iyo saamaha ceeriin.

3. In ay hargaha iyo saamaha Dalka gaarsiiso farsamada casriga si noocoodu u gaaro heer sare.

4. In ay horumariso Warhadaha hargaha ee jira, una hawl gasho dhismaha warshado cusub.

Qod. 3aad

*(Hawlaha Wakaaladda)*

Hawlaha Wakaaladdu waxay yihiin:

1. Gadidda, ururinta iyo u gudbinta hargaha iyo saamaha ceeriin warshadaha hargaha iyo saamaha ee hoos yimaada Wakaaladda;

2. U dhoofinta dibadda hargaha iyo saamaha ceeriin iyo kuwa farsameysan;

3. Suuq u raadinta alaabta laga sameeyo hargaha iyo Saamaha Dalka;

4. Dibad ka keenidda daawooyinka iyo alaabta looga baahdo warshadeynta iyo wax soo saaridda alaabta la xiriirta hargaha iyo saamaha;

6. Iskaashiga iyo la wada shaqeynta Dawladaha Hoose iyo u fududeynta waxyaabaha la xiriira xoolaha si loo hagaajiyo noocyada hargaha iyo saamaha;

7. Baarista iyo tijaabinta farsamada si horumar iyo horukac loogu sameeyo hargaha iyo saamaha.

Qod. 4aad

*(Xarunta iyo Laamaha)*

Xarunta Wakaaladdu waa magaalo-madaxda Muqdisho, hase yeeshee haddii loo baahdo, waxay laamo ku yeelan kartaa Dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

Qod. 5aad

*(Kormeerka iyo Awoodda Wasiirka)*

1. Kormeeridda guud ee Wakaaladda waxaa yeelanaya Wasiirka Wasaaradda Warshadaha;

2. Wasiirku, Wakaaladda wuxuu ku leeyahay awood mas'uuliyad buuxda, xagga jaangooyada, dhaqaalaha iyo horumarinta, hagaagsanaanta xisaabaadka, gadashada iyo sii gadidda qalabka ama alaabta Wakaaladda iyo wixii heshiis ganacsi ah;

3. Miisaaniyadda Wakaaladda, oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda Warshadaha ka dib, waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 6aad

*(Awoodda)*

1. Wakaaladda waxay leedahay awood ay ku fuliso ujeeddooyinka uu Sharcigan u xilsaaray, ayadoo soo saari doonta awaamiir iyo nidaam-hoose oo u gaar ah;

2. Wakaaladda waxay leedahay summad ganacsi oo la yiraahdo «HASA» iyo sajilaad u gaar ah.

Qod. 7aad

*(Xubnaha Wakaaladda)*

Wakaaladdu waxay leedahay xubnaha soo socda:

— Maareeyaha Guud;

— Maareeyayaasha Waaxyaha Wakaaladda;

— Maareeyayaasha Warshadaha.

Qod. 8aad

*(Maareeyaha Guud)*

1. Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo wakiil ka ah Wakaaladda, inuu fuliyo ujeeddooyinka loo dhisay Wakaaladda iyo socodsiinta go'aannada iyo hawlaha Wakaaladda;

2. Wuxuu mas'uul ka yahay hantida Wakaaladda;

3. Wuxuu kormeerayaa hawlaha Wakaaladda iyo Hay'adaha hoos yimaada waana inuu la socdaa fulinta siyaasadda Wakaaladda loo dejiyey iyo u raadinta kaalmada lacagta iyo farsamada;

4. Wuxuu kormeerayaa kharajka wax soo saarka iyo hantida Wakaaladda iyo Hay'adaha hoos yimaada;

5. Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

Qod. 9aad

*(Maareeyayaasha)*

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Maareeyayaal madax ka ah Waaxyaha Wakaaladda iyo Warshadaha hoos yimaada;

2. Maareeyayaasha Wakaaladda iyo kuwa Warshadaha hoos yimaada waxaa lagu magacaabayaa dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha J.D.S., isagoo tixgelinaya Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, dhegeystayna Maareeyaha Guud ee Wakaaladda.

Qod. 10aad

gè?ow.9

*(Xuquuqda Qaanuuniga ah iyo kuwa dhaqaalaha ee Shaqaalaha Wakaaladda)*

1. Xuquuqda qaanuuniga ah iyo kuwa dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha Waaxyaha Wakaaladda iyo kuwa Warshadaha, iyo Shaqaalaha kale waxaa xakumaya Sharciga lambar 36 ee 22kii Abriil 1972, kuna saabsan Shaqaalaha Wakaaladda madax bannaan iyo Sharciga Shaqaalaha Dawladda;

2. Xuquuqda Shaqaalihii hore uga tirsanaa Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha, Warshadda Hargaha ee Muqdisho, Warshadda Hargaha ee Kismaayo, Warshadda Hargaha Hargeysa iyo Warshadda Hargaha ee

Burco, waxaa lagu wareejinayaa Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed, iyadoo loo aqoonsanayo shaqadii hore mid sii socota, laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray.

Qod. 11aad

*(Qaabka Wakaaladda)*

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa qaab la xiriira dhismaheeda;

2. Qaabka Wakaaladda waxaa lagu soo saarayaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha J.D.S., isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, dhegeystayna Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bushada.

Qod. 12aad

*(Maamulka Warshadaha)*

1. Warshadaha Hargaha, iyagoo ka tirsan Wakaaladda, waxay yeelanayaan maamul iyo miisaaniyad u gaar ah oo ku saleysan dabeecadda wax soo saarka Warshadaha;

2. Habka Maamulka Warshadaha iyo xiriirka ka dhexeeya maamulka Warshadaha iyo Hoggaanka Dhexeee Wakaaladda waxaa lagu nidaaminayaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha J.D.S., isagoo dhegeystay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

Qod. 13aad

*( Hantida )*

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay:

1. Hantida iyo qiimaha qalabka, guryaha iyo gaadiidka ay leeyihiin Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha, Warshadda Hargaha iyo Kabaha ee Muqdisho, Warshadda Hargaha ee Kismaayo, Warshadda Hargaha ee Hargeysa iyo Warshadda Hargaha ee Burco;

2. Wixii lacag ah ee ka soo gala hawlaha ay qabato Wakaaladda iyo Hay'adaha hoos yimaada iyo wixii hanti kale ee Wakaaladdu yeelato.

Qod. 14aad

*(A m a a h)*

Wakaaladdu, iyadoo oggolaansho ka haysata Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, waxay lacag ka amaahan kartaa Bankiyada Dalka iyo kuwa dibadda, si ay u fuliso hawlaha loo xilsaaray.

Qod. 15aad

*(Miisaaniyadda)*

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa miisaaniyad u gaar ah;

2. Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu wuxuu 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa ee sannad kasta isku dubbaridayaa miisaaniyadda sannadka isagoo muujinaya dakhliga iyo kharajka, wuxuu hordhigayaa Wasiirka Wasaaradda Warshadaha si uu u oggolaado;

3. Miisaaniyadda Wakaaladda, oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda Warshadaha ka dib, waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

4. Miisaaniyadda Wakaaladdu waa qayb ka mid ah miisaaniyadda guud ee Dawladda;

5. Sannadka lacagta ee Wakaaladdu wuxuu billaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad kasta.

Qod. 16aad

*(Xisaabxirka)*

1. Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu 31ka Maarso ama ka horba waa inuu isku dubbaridaa xiritaanka xisaabaadka sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajinaya dakhliga iyo kharajka, muujinayana macaashka ama khasaaraha Wakaaladda, wuxuu xisaabxirkaas hordhigayaa Wasiirka Wasaaradda Warshadaha si uu u oggolaado, kaddibna waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, inuu oggolaado xiritaanka xisaabaadka, wuxuuna amri karaa in xisaabaadka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda iyadoo kharajka ay bixineyso Wakaaladdu.

Qod. 17aad

*(Baarista Xisaabaadka)*

1. Xisaabka Wakaaladda waa in mar kasta lagu habeeyaa Sharciyada Xisaabaadka ee Dawladda;

2. Xisaabaadka Wakaaladda waxaa baaraya Hanti dhowrka Guud, waxayna warbixintooda u gudbinayaan Hay'adaha ku shaqo leh.

Qod. 18aad

*(La-wareegid Xuquuq iyo Waajibaad)*

Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed waxay la wareegeysaa wax alla wixii hanti iyo xuquuq ah oo ay lahaayeen Wakaaladda iyo Warshadaha Shrcigan lagu mideeyey, waxayna qaadeysaa deymanka iyo waajibaadka sharci ahaan saarnaa Hay'adahaas.

Qod. 19aad

*(Xeer Nidaamiye)*

Madaxweynaha JDS, isagoo dhegeystay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, wuxuu soo saarayaa Xeer dhammeystiraya Sharcigan.

Qod. 20aad

*(B u r r i n)*

Waxaa la burriyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo hor jeeda Sharcigan, ama aan la socon karin, gaar ahaan:

a) Sharciga lambar 2 ee 16.5.1973;

b) Sharciga lambar 16 ee 10.2.1977;

t) Sharciga lambar 50 ee 18.7.1977;

j) Sharciga lambar 14 ee 17.2.1980.

Qod. 21aad

*(Dhaqangelid)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii-xo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jahuuriyadda.

Muqdisho, 18 Juunyo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

Jaalle Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 44 ee 18 Juunyo 1981, Dhismaha Mashruuca Ciribtirka Gosha iyo Gendiga.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.
Sharciga sii socda:

WUXUU SOO SAARAYAA

Qod. 1aad

*(Dhismaha Mashruuca Gosha iyo Gendiga)*

1. Waxaa halkan lagu dhisayaa Mashruuac Ciribtirka Gosha iyo Gendiga;

2. Mashruucu wuxuu yahay mid madax bannaan oo awood iyo jiritaan qaanuuni ah leh;

3. Mashruucu wuxuu hoos imaanayaa Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 2aad

*(Xarunta Mashruuca)*

1. Xarunta Mashruuca waxay ahaan doontaa Xamar, hase yeeshee wuxuu Mashruucu xarun ku yeelanayaa Afgooye oo noqon doonta xarun madaxeedka Webiga Shabeelle iyo Kismaayo oo ah xarun madaxeedka Webiga Jubba;

2. Xafiis Laameed waxaa laga dhisi doonaa meel kasta oo kale oo loo aqoonsan karo inay lagama maarmaan u tahay socodsiinta hawlaha Mashruuca.

Qod. 3aad

*(Ujeeddooyinka Mashruuca)*

1. Mashruuca Ciribtirka Gosha iyo Gendiga wuxuu:

b) Hirgelinayaa tababar saameynaya Sahminta Gendiga, Cilmi baadhista iyo hababka ciribtirka Gendiga si loo dhiso Urur Gendiga ciribtirkiisa karti u leh;

t ) Si dhab ah u xaqiijinaya soohdimaha Gendiga ee Soomaaliyeed;

j ) Hirgelinayaa tijaabooyinka ku saabsan hababka kala duwan ee isticmaalka Sunta.

x) Habeynayaa hannaanka ugu habboon ee dhulka looga faa'iideysan karo;

kh) Fulinta waxyaabaha ay qorayaan Heshiisyada dhexmaray JDS iyo Hay'adaha Caalamiga ah (AFSEED-USAID), dhinaca ka khuseeya la dagaalanka Gosha iyo Gendiga;

d) Hirgelinaaya nidaam lagu qiyaasi karo waxyeellada hawlaha ciribtirka Gosha iyo Gendiga u yeelan karto degaanka.

Qod. 4aad

*(Awoodda Mashruuca)*

1. Mashruuca wuxuu leeyahay awood uu ku fulinkaro ujeeddooyinka ku xusan Qod. 3aad ee Sharcigan.

Qod. 5aad

*(Kormeer iyo Awoodda Wasiirka)*

1. Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, ayaa mas'uul ka ah dejinta Siyaasadda Guud ee Mashruuca lagu maamulayo, isagoo tixgelinaya Ujeeddooyinka Guud ee Mashruuca lagu iyo talada Guddiga Isuduwidda ee ku xusan Qod. 9aad ee Sharcigan;

2. Wasiirka wuxuu talo ka bixinayaa magacaabidda madaxda Mashruuca, wuxuuna leeyahay awood kormeer;

3. Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa kaddib markuu la tashado Maareeyaha Guud ee Mashruuca, wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Nidaamin ku saabsan fulinta hawlaha Mashruuca.

Qod. 6aad

*(Maareeyaha Mashruuca)*

Maareynta Mashruuca waxay ka kooban tahay:

1. Maareeyaha Guud ee Mashruuca;
2. Maareeyayaasha oo madax ka noqonaya Waax-yaha Mashruuca.

Qod. 7aad

*(Awoodda Maareeyaha Guud)*

Maareeyaha Guud ee Mash. wuxuu mas'uul ka yahay:

b) Fulinta Ujeeddooyinka Mashruuca;

t) Maamulka Guud;

j) Qoridda asluubta iyo daryeelka shaqaalaha;

x) Maamulka Lacagta;

kh) Saxiixa Heshiisyada Mashruucu dhinac ka yahay isagoo la tashanaaya Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 8aad

*(Magacaabidda madaxda Mashruuca)*

1. Maareeyaha Guud iyo Maareyayaasha Waax-yaha waxaa lagu magacaabayaa Dekreeto Madaxwey-ne, isagoo dhegeystay Wasiirka Wasaaradda Xannaa-nada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 9aad

*(Guddiga Isuduwidda Mashruuca)*

Gud. Isudu/da. Mash. wuxuu ka kooban yahay:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wasiir. Wasaa/da X. X. Dh.&D. | Guddoomiye |
| 2. | Wasiirka Wasaaradda Beeraha | Xubin |
| 3. | Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda | Xubin |
| 4. | Wasiirka Qorsheynta Qaranka | Xubin |

5. Xog. Xisbiga Gobolka shaqadu ka socoto Xubin

6. Maareeyaha luud ee Mashruuca Xoghayn

b) Guddiga Isuduwidda Mashruuca wuxuu mas'uul ka yahay Siyaasadda iyo qorshaha sare ee Mashruuca iyo hubinta hirgelinta Mashruuca;

t) Guddigu wuxuu kulmayaa sannadkiiba mar, hase yeeshee waxay yeelan karaan fadhiyo, aan caadi ahayn, haddii loo baahdo.

Qod. 10aad

1. Mashruucu, wuxuu awood buuxda u leeyahay qoritaanka Shaqaalaha, isaga oo raacaya Sharciga shaqo qorista;

2. Mashruucu wuxuu awood u leeyahay inuu Dibedda ka keeno khubaro ajnebi ah, haddii loo baahdo isagoo raacaya Sharciyada Dalka iyo oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 11aad

*(Hantida Mashruuca)*

Hantida Mashruuca waxay ka kooban tahay:

1) Lacagta dakhliga ah ee ka imaaneysa Heshiisyada amaahda oo ay Dawladdu la gashay hay'ado Caalami ah;

2) Wixii lacag ah oo ka soo gala hawlaha uu Mashruuca qabto;

3) Wixii hanti ah ee Dawladda iyo Ururrada Caalamiga ah ugu deeqaan Mashruuca;

4) Wixii lacag keyd ah oo Mashruuca sannad kasta u dhigmo.

Qod. 12aad

*(Miisaaniyadda iyo Xisaabaadka Sannadka)*

1. Maareeyaha Guud ee Mashruuca wuxuu, inta ka horreysa 31da Oktoobar ee sannad kasta soo diyaarinayaa Miisaaniyadda sannadka soo socda;

2. Maareeyaha Guud ee Mashruucu wuxuu, 31da Maarso ee sannad-kasta, dhaqan gelinayaa soo diyaarinta Xisaab xidhka sannadkii tegay wuxuuna u gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 13aad

*(Xisaabaadka)*

1. Xisaabaadka Mashruuca waxaa lagu dhaqayaa habka maamulidda Xisaabaadka ee Wakaaladaha madax bannaan ee Dalka. Maamulidda «Afsed» ee ku xusan Heshiiska la kala saxiixday, lana meelmariyey 28.12.1980.

Qod. 14aad

*(Dhowrista Hantida Mashruuca)*

1. Mashruucu wuxuu gudihiisa ku yeelanayaa hanti-dhowr, hase yeeshee Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha maalgelinaya wey ku sameyn karaan baadhis hanti dhowr;

2. Hantida Mashruuca waxaa awood u leh inuu baaro hanti-dhowrka Guud ee Dawladda.

Qod. 15aad

*(Dhaqan Galka Sharcigan)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 35 ee 28 Seb. 1981, Kirada Cusub ee Baabuurta Xamuulka qaadda, Booyadaha iyo Iskarogeyaasha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

HADDUU ARKAY: Xeerkii lamb. 240 iyo 89 taariikh 29.9.70 iyo 1.6.67 ee ku saabsan Sonkorta iyo qalabka kala duwan;

HADDUU ARKAY: Xeerarka Madaxweynaha JDS ee ku saabsan Kirada cusub ee Baaburta Xamuulka qaadda Booyadaha iyo Iska rogeyaasha lamb. 58, 47, iyo 48 taariikh 27.11.72, 1.1.78 iyo 23.8.79;

HADDUU KA WAR HELAY: Dhibaatooyinka Baabuurleyda Gaadidka ka haysata xagga qiimaha kacaya muddadii xeerarkii hore ee xaddidaayey qiimaha kirada baabuurta;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee XHKS iyo Golaha Wasiirada.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

In baabuurta tankiisu ka badan yahay 10ka tan ee Xamuulka kala duwan qaada (General Cargo) marka uu marayo waddada aan laamiga ahayn (Waddo Xun) ay noqoto 55 senti tan/Km.kiiba, marka uu waddo laami ah marayana ay noqoto 45 senti tan/Km. kiiba.

Qod. 2aad

Waddada qaybinaya xun tahay qaybinaya laami tahay, waddo xun oo aan laami ahayn ayaa loo xisaabi doonaa, haddii qaybta laamiga ahi ay gaadho ama ka yar tahay saddex daloolkiiba dalool. Haddiise saddex daloolkiiba dalool ay ka badan tahay laamigu qaybta laamiga ahna waxaa lagu qaadi doonaa 45 senti, qaybta xunna waxaa lagu qaadi doonaa 55 senti tan/Km. kooba.

Qod. 3aad

Baabuurta tankoodu u dhexeeyo 6-10 ee Xamuulka kala duwan qaada kiradoodu waxay noqon doontaa 55 senti tan/Km. kiiba waddo kasta ay marayaanba.

Qod. 4aad

Baabuurta Booyadaha iyo Iska rogeyaasha ah ee tankoodu u dhexeeyo:

b) 6-7 tan waxaa maalintii lagu kireynayaa Shs. 350/= Shidaalkana waxaa la baxaya kireystaha;

t ) 8-10 tan waxaa maalintii lagu kireynayaa Shs. 400/= Shidaalkana waxaa la baxaya kireystaha;

j ) 20-25tan waxaa maalintii lagu kireynayaa Shs. 700/= Shidaalkana waxaa la baxaya kireystaha.

Qod. 5aad

Jidadka ay dhibaatadoodu xad dhaafka tahay, haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxaa go'aan gaar ah ka gaari kara Wasaarada Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ka dib marka ay soo qorato Hay'adda arrintu khusayso.

Qod. 6aad

Baabuurta la kireysto ee madhnaanta loogu diro meesha xamuulka yaal, meeshaas oo ka baxsan xadka magaalada ama Tuulada laga dirayo, kharashka saliidda lagu gaadhayo halka kiradu taal waxaa bixin doona cidda baabuurta kiraysanaysa.

Qod. 7aad

Baabuurta ay u baahdaan Shirkadaha qalaad ee Dalka Soomaaliyeed ka shaqeysta (Shirkaddaha Macdanta, Jidadka, Gegooyinka, Dayuuraddaha iyo Dekeddaha) kirada ay wax ku qaadanayaan waxaa laga gaari karaa go'aan khaas ah.

Wasaaradda yaadiidka Dhulka iyo Cirka waxay awood u leedahay in ay amar gaar ah ka soo saarto oo xadidayo Kirada baabuurta qodobkan ku tilmaaman.

Qod. 8aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxeexo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Qod. 9aad

Waxaa la baabi'iyey Xeer kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin Xeerkan.

Muqdisho, 28 Sebt. 1980

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA WAS. GAA. DH. & C.

Dr. Kenadiid Axmed Yuusuf

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo Lambarkiisu ahaa 264837 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xisabaha Guud kuna Qorneyd Lacag dhan Sh. So. 50.000/= ay iska lahayd Seynab Yuusuf Cali sida ku cad warqadda Lam. 009851 Taariikh 11.7.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xisabaha Guud:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeeg Lamb. 264837 oo ku qoran magaca Seynab Yuusuf Cali ayna ku jirtto Sh. S. 50.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xisabaha Guud u bedelo Seynab Yuusuf Cali Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.7.81.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo Lambarkiisu ahaa 300459 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xisabaha Guud lakuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 12.000/= ay iska lahaa Seynab Yuusuf Cali sida ku cad Warqadda Lamb. 009851 Taariikh 11.7.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xisaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lamb.2 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 300459 oo ku qoran magaca Seynab Yuusuf Cali ayna ku jirto Sh.So. 12.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xisaabaha Guudu beddelo Seynab Yuusuf Cali Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.7.81

Guddoo. Max. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 659

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY in Jeegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 158959 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Berbera, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 20.000, uu iska lahaa Cabdullaahi Axmad Nuur sida ku cad warqadda lambar-009868, taariikh 14.7.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xisaabaha Guud;
HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 29.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga wareega lam. 158959 oo ku qoran magaca Cabdullaahi Axmad Nuur ayna ku jirto Sh. So. 20.000.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xisaabaha Guud beddelo Cabdullaahi Axmad Nuur, Jeegga wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood, maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaaga ah laga keenin.

Muqdisho, 15 Luulyo 1981.

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 661

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY in Jeegga wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 023186, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Dhexe, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 1.000, uu iska lahaa Cabdullaahi Axmad Nuur, sida ku cad warqadda lamb. 009907, taariikh 15.7.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Dhexe;

HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 29.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga wareega lam. 026186 oo ku qoran magaca Cabdullaahi Axmad Nuur ayna ku jirto Sh. So. 1.000.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Dhexe u beddelo Cabdullaahi Axmad Nuur Jeegga wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15 Luulyo 1981.

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 662

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY in Buugga keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 959, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 3aad, kuna qorneydlacag dhan Sh. So. 19.242, ay iska lahaa Salaado Cabdulle Jaamac sida ku cad warqadda lamb. 768, taariikh 8.6.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad;

HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 29.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga keyd lam. 959 oo ku qoran magaca Salaado Cabdulle Jaamac ayna ku jirto Sh. So. 19.242.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad, u beddelo Salaado Cabdulle Jaamac, Buugga keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horreeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9 Juunyo 1981.

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 663

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY in Buug keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 16068, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 7.000, uu iska lahaa Asli Maxamed Cali, sida ku cad warqadda lamb. ? ? ? taariikh 22.6.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad;

HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 29.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga keyd Lam. 16068 oo ku qoran magaca Asli Maxamed Cali ayna ku jirto Sh. So. 7.000.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad u beddelo Asli Maxamed Cali, Buug keyd oo kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24 Juunyo 1981.

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 664

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Jeegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 143126,lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Garbahaareey kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu islamb. 009150 Taariikh 9.6.81 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Garbahaareey.

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lamb.2 9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lamb. 143126 oo ku qoran magaca Xasan Warsame Cigaal, ka lahaa Xasan Max'ed Xuseen sida ku cad warqadda ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Garbahaareey u beddelo Xasan Maxamed Xuseen Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kaddib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.6.81

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 666

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buugga Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 12921 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 9.000/= uu iska lahaa Maxamuud Xasan Hiraabe sida ku cad warqadda lam. 01244 Taariikh 3.6.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lamb.2 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd lamb. 12921 oo ku qoran Magaca Maxamuud Xasan Hiraabe ayna ku jirto Sh.So. 9.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u bedelo Maxamuud Xasan Hiraabe Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.6.81

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 665

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 276880 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 30.000/= uu iska lahaa Cusmaan Max'ed Daa'uud sida ku cad warqadda lamb. 007336 taariikh 1.6.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Dhexe;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lamb.2 9.9.65.

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lamb.276880 oo ku qoran magaca Cusmaan Maxamed Daa'uud ayna ku jirto Sh.So. 30.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe u beddelo Cusmaan Maxamed Daa'uud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.6.81

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 667

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 11681 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 12.000/= uu iska lahaa Axmed Ducaale Cabdi sida ku cad warqadda lamb. 1050 Taariikh 14.7.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lamb.2 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka Lamb. 11681 oo ku qoran magaca Axmed Ducaale Cabdi ayna ku jirto Sh. So. 12.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga Keydka laanta Saddexaad u beddelo Axmed Ducaale Cabdi Buugga Keydka ee kor tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.7.81

Guddoo. Max. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 668

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 11027, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad, kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 7.458/= uu iska lahaa Cali Barre Cabdulle, sida ku cad warqadda lamb. 1068, Taariikh 19.7.81, oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka Lamb. 11027, oo ku qoran magaca Cali Barre Cabdulle ayna ku jirto Sh. So. 7.458/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad, u beddelo Cali Barre Cabdulle, Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.7.81

Guddoo. Max. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 669